**Degdeg! Barashada af noorwiijiga iyo culuunta bulshada oo bilaash ah**

**Xuqqa barashada af noorwiijiga iyo culuunta bulshada oo bilaash ah**

Ogolaanshaha deggenaanshahaaga Noorwey ayaa wuxuu xaq kuu siin karaa i sugayn 300 oo saacadood oo ah barrida

- Af noorwiijiga(250 saacadood), iyo
- Culuunta bulshada (50 saacadood )

Waxbariddu waa bilaash mudo sedex sano ah

- Laga bilaabo markii lagu siiyay ogolaansho deggenaan, ama
- Laga bilaabo markaad timid Noorwey adoo wata ogolaansho deggenaan oo aan dhicin

Hadaadan bilaabin, ama aadan ku dhameynin waxbarashada sadexdaa sano gudohooda, waa inaad adiga iskabixisaa waxbarashada.

**Waajib ah barashada noorwiijiga iyo culuunta bulshada**

Waa waajibaad kaa saarnaan karaa inaad dhameysato 300 oo saacadood oo ah barashada noorwiijiga iyo culuunta bulshada, si laguu siiyo hadaad codsato

- ogolaansho deggenaansho oo daa'im ah, iyo/ama
- jinsiyad

Waxaad codsankartaa in lagaa qaado waajibaadka waxbarida hadaad

- Caddeyn karto inaad u leedahay aqoon kugu filan luuqada noorwiijiga  ama tan saamiga ah, ama
- hadey jirto xaalad gaara oo caafimaad ama sababo kale oo adkeynaya waxbarashada.

**Warbixin faa'iido leh**

Waa inaad adiga la xiriirtaa goobta waxbarashada dadka waaweyn ee gobolka aad ka diwaangashantahay, si aad u codsato waxbarashada, ama hadaad dooneyso inaad codsato in lagaa qaado waajibka waxbarashadaas.  Haddad qabtid su'aal ama u baahanahay warbixun ku saabsan waqtiyada kama dambeynta ah iyo xuquuqaha, la xiriir goobta waxbarashada  dadka waaweyn

Waxaad sidoo kale warbixin ka heli kartaa shabakadaha;  www.imdi.no iyo www.udi.no